


# QORSHAHA HORUMARINTA GAROONKA DIYAARADAHA EE WAARA (SAMP) – DIB U EEGISTA DEEGAANKA EE NEPA SU'AALAHA INTA BADAN LA ISWEYDIIYO

## GUUD

### 1. WAA MAXAY QORSHAHA WAARA EE MAAREYNTA GAROONKA DIYAARADAHA?

**Qorshaha Waara ee Maareynta Garoonka Diyaaradaha (SAMP)** waa qorshaha wax-ka-beddelka ee Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma (SEA) si loo daboolo baahiyaha mustaqbalka ee la saadaaliyay. Habka qorshaha guud ayaa la dhameystiray 2018. SAMP waxa uu aqoonsaday 31 Mashruuc oo Muddo Gaaban ah (NTPs) kuwaas oo loogu talagalay in loogu adeego 56 milyan oo rakaab ah sannad walba iyo sidoo kale duulimaadyada iyo howlaha xamuulka si heer adeeg oo fiican, sida ku cad heerarka Ururka Caalamiga ah ee Gaadiidka Cirka.

Hadda, dib-u-eegista deegaanka ee Xeerka Qaran ee Siyaasadda Deegaanka (NEPA) ayaa socota, iyadoo la filayo in dukumeentiga qabyo-qoraalka NEPA la sii daayo dayrta 2024. Marka habka NEPA la dhameystiro, dib-u-eegista Xeerka Siyaasadda Deegaanka ee Gobolka (SEPA) ayaa xigi doona

### 2. MAXAY YIHIIN MASHAARIICDA LA SOO JEEDIYAY?

Waxyaabaha muhiimka ah ee NTPs (tusaale ahaan, Tallaabada La Soo Jeediyay) waxaa ka mid ah dhismaha terminaal labaad, xarunta dayactirka ee dhexe, xarumaha wax-ka-qabashada xamuulka ee ka baxsan garoonka, dib-u-habaynta waddooyinka garoonka, iyo ballaarinta goobaha shidaalka. Waxyaabaha ugu waaweyn waxaa kamid ah:

- Terminaal labaad oo leh 19 albaab oo dheeraad ah
- Jidka basaska oo sareeya iyo saldhigyada isku xira xarunta kirada baabuurta ee hadda jirta, terminaal-ka cusub, iyo terminaal-ka weyn
- Xarumaha xamuulka oo lagu beddelayo xarumaha hadda jiray iyo kuwa lagu taageerayo xamuulka hawada
- Dib u habeynta waddooyinka garoonka diyaaradaha
- Cusbooneysiinta garoonka diyaaradaha si loo hagaajiyo badqabka iyo hufnaanta
- Kaabayaasha baarkinka cusub si loogu adeego terminaalka labaad
- Tas-hiilaad dheeri ah oo loogu talagalay shidaalka duulista

### 3. MAXAA LOO BALAARINAYAA SEA?

Cilmi-baarista Aasaasiga ah ee Diyaaradaha Gobolku ee la sameeyay 2021 Golaha Gobolada Puget Sound ayaa ogaatay in, iyadoo lagu saleynayo baahida la saadaaliyay, ay jiri doonaan 27 milyan oo rakaab dheeraad ah sannadkii marka loo eego inta SEA ay ku taageeri karto heer adeeg ee ugu wanaagsan ilaa 2050. Haddii aan la dhisin xarumo cusub oo loogu talagalay baahida mustaqbalka la saadaaliyay, ciriiriga ka jira SEA ayaa kordhi doona, taasoo keeni doonta dib-u-dhac dheeraad ah iyo heer adeeg oo sii xumaada.

## DIB U EEGISTA DEEGAANKA

### 1. MAXAY TAHAY UJEEDADA DIB U EEGISTA DEEGAANKA?

Ujeedada dib u eegista deegaanku waa in la qiimeeyo saamaynta deegaanka ee ka iman karta mashruuca la soo jeediyay ka hor inta aan la fulin. Ujeedooyinka muhiimka ah waxaa ka mid ah:

- Go'aan-qaadasho xog-ogaal ah
- Daah-furnaan buuxda iyo ka-qaybgalka dadweynaha ee habka go'aan qaadashada
- U hoggaansanaanta shuruucda iyo xeerarka
- Aqoonsiga hababka lagu ka fogaado, lagu yareeyo, ama lagu xakameeyo saameynta

## 2. WAA MAXAY FARQIGA U DHEXEEYA NEPA IYO SEPA?

Xeerka Siyaasadda Deegaanka Qaranka, ama NEPA, waa siyaasad federaali ah oo u baahan hay'adaha federaalku inay qiimeeyaan saamaynta deegaanka ee ficiladooda la soo jeediyay ka hor intaanay go'aannada gaarin oo ay siiyaan dadweynaha fursado rayi uruurin. Maamulka Duulimaadyada Federaalka waa hay'adda hormuudka u ah NEPA.

Sharciga Siyaasadda Deegaanka ee Gobolka, ama SEPA, wuxuu uga baahan yahay wakaaladaha heerka gobolka inay sidaas oo kale sameeyaan. Iyadoo la raacayo NEPA EA, Dekeddu waxay samayn doontaa dib u eegis deegaan oo gooni ah oo hoos timaada SEPA. Dekadda Seattle waa hay'adda hoggaanka u ah SEPA, sharciga gobol kasta.

## 3. WAA MAXAY QIIMAYNTA DEEGAANKA (EA)?

Qiimaynta Deegaanka (EA) ayaa loo diyaariyey si loo go'aamiyo haddii ficilka federaalku uu yeelan doono saameyn weyn. Tallaabo kasta oo aan si gaar ah looga saarin oo aan u baahnayn Bayaanka Saamaynta Deegaanka (EIS), waxay leedahay saamayn aan la hubin, ama leh arrimo deegaan oo aan la xallin, waxay u baahan tahay diyaarinta EA.

## 4. SIDEEN UGA FAALLO UGA DHIIBAN KARAA QABYO-QORAALKA EA?

Rayi ka dhiibashada qabyo-qoraalka EA waa hab muhiim u ah dadweynaha si ay uga qaybqaataan habka dib u eegista deegaanka oo ay gacan uga geystaan habka go'aan qaadashada. Dekadda waxaa ka go'an hab la heli karo, oo la fahmi karo habka faallooyinka dadweynaha. marka xilliga faallooyinka dadweynuhu furmo dabayaaqada dayrta 2024, xubnaha bulshada iyo dhinacyada kale ee danaynaya waxay awood u yeelan doonaan inay dib u eegaan macluumaadka lagu turjumay lix luuqadood oo ay soo gudbiyaan faallooyinka inta lagu jiro xilliga faallooyinka shir dadweyne, onlayn, Iimayl, ama boostada caadiga ah. Dukumeentiga waxaa laga heli doonaa mareegaheena iyo maktabadaha dadweynaha ee Burien, Des Moines, iyo SeaTac. Faallooyinku waa inay bixiyaan tafaasiil ku filan hay'adda si ay u fahamto mawqifka faalo bixiyayaasha iyo sababta arimaha lasoo qaaday ay muhiim ugu yihiin habka go,aan qaadashada.

## 5. MUDO IN LE'EG AYAY NOQON DOONTAA XILLIGA FAALLOOYINKA DADWEYNAHA?

FAA waxa ay xaqiijisay 45-maalmood muddo faallo ah, taas oo ah kordhinta heerka 30-ka maalmood ee muddada faallooyinka dadweynaha ee NEPA EA.

## 6. MAXAA DHACAYA KADIB MARKAAN DHIIBTO FAALLOOYINKAYGA?

Dhammaadka xilliga faallooyinka, dhammaan faallooyinka la helay waxaa dib u eegi doona oo tixgelin doona FAA iyo Dekedda inta lagu jiro diyaarinta EA kama Dambaysta ah. Jawaabaha faallooyinka waxaa lagu dari doonaa EA kama Dambaysta ah.

## 7. SIDEED UGA QAYBQAADANAYSAA BULSHOOYINKA INTA LAGU JIRO HABKA DIB U EEGISTA DEEGAANKA?

Hawlgalka bulshada waxa uu ku lug leeyahay istiraatiijiyado dhowr ah si loo xaqiijiyo hufnaan, ka mid noqosho, iyo ka-qaybgal macno leh. Kuwani waxaa ka mid ah kulamada dadweynaha, ka-qaybgalka daneeyayaasha, muddada faallooyinka furan, iyo tarjumaad iyo helitaan joogto ah oo la xiriira marxaladaha muhiimka ah ee mashruuca. Marka muddada faallooyinka dadweynaha ay furanto 21 da Oktoobar, 2024, xubnaha dadweynuhu waxay awood u yeelan doonaan inay dib u eegaan macluumaadka lagu turjumay lix luqadood oo ay soo gudbiyaan faallooyinka inta lagu jiro xilliga faallooyinka shir dadweyne, onlayn, iimayl, ama boostada caadiga ah. Dukumeentiga waxaa laga heli doonaa mareegaheena iyo maktabadaha dadweynaha ee Burien, Des Moines, iyo SeaTac.

## 8. SIDEEN WAX BADAN UGA BARAN KARAA OO AAN ULA SOCON KARAA HABKA DIB U EEGISTA DEEGAANKA EE SAMP?

Si aad wax badan u barato, booqo mareegaheena mashruuca ee **www.sampntpenvironmentalreview.org**. Waxa kale oo aad iska diiwaan gelin kartaa si aad u hesho iimaylo si aad ulasocoto dib u eegista deegaanka SAMP ee Mashaariicda Muddada dhow adiga oo dooranaya sanduuqa ogeysiinta Qorshaha Guud ee Garoonka diyaaradaha ee hoos yimaada qaybta “Deegaanka iyo qaybaha wararka” ee qaybta Isdiiwaan galinta Bogeena.